

## DIBLOOMADA DUGSIGA SARE EE GOBOLKA WASHINGTON



Haddii ay diyaar u yihiin inay noqdaan dhakhtar ama makaanik, ay ciidamada ku biiraan ama ku biiraan waaxda teknooloojiyadda, ardayda Gobolka Washington waxay leeyihiin ikhtiyaaro aad u badan xagga shaqada mustaqbalka dugsiga sare kadib. Dibloomada Dugsiga Sare ee Gobolka Washington waxay siisaa ardayda xirfadaha iyo aqoonta ay u baahan yihiin si ay himiladooda u raadsadaan oo ay u soo bandhigaan jidka ay doonaan haddii ay raacaan wixii ka danbeeya dugsiga sare, ay diyaar u noqdaan inay shaqeeyaan, waxbarashada sii wataan, iyo fursadaha kale.

## DABACSAN.

Dibloomada Dugsiga Sare ee Gobolka Washington waxay leedahay shuruudo dabacsan oo xaqiijiya in ardaydu hesho xirfadaha ay u baahan yihiin iyo aqoonta daruuriga ah si ay u galaan shaqada ama u sii wadaan waxbarashada – sida tabobarada, shahaadooyinka, barnaamijka digriiga – iyo inay helaan fursad ay ku sahaminayaan waxa ay rabaan iyo koorasyada waafaqsan yoolalkooda mihiinadeed.

## WAX-KU-OOL AH.

Heer kasta oo waxbarashadooda ah, ardaydu waxay helaan fasalo waxbarasho oo adag iyo kuwa shakhsi ahaaneed oo ka caawin doona inay u diyaargarobaan noloshooda ka danbaysa dugsiga sare.

## LA KASBAN KARO.

Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii ka Danbeeya ee ardaydu kusoo bilaabeen inay samaystaan dugsiga dhexe waxay u tahay seeska lagu dhisayo xagga kasbashada Dibloomada dugsiga Sare ee Gobolka Washington iyo yoolalkooda muddada dheer.

### DUGSIGA SARE

WADARTA 24 DHIBCOOD

17 AASAASKA AH










7 KALA-DOORASHO

### DUGSIGA DHEXE

Fursado lagu heleyo dhibco dugsiga sare ah

Isku duwaangelinta Deeqda Waxbarasho ee College Bound.

Bilaabista Qorshaha Dugsi Sare iyo Wixii Ka Danbeeya

 <b>INGIRIISI</b>	 <b>SAYNIS</b>	 <b>XISAAB</b>	 <b>CILMIGA BULSHADA</b>	 <b>CAAFIMAADKA &amp; JIMICSIGA</b>	 <b>FARSHA-XANKA</b>	 <b>WAXBARASHADA SHAQADA &amp; FARSAMADA</b>	 <b>KALA-DOORASHO</b>	 <b>PERSONALIZED JIDKA (PPR)*</b>
4 BUUNDO	3 BUUNDO	3 BUUNDO	3 BUUNDO	2 BUUNDO	1 BUUNDO	1 BUUNDO	4 BUUNDO	3 BUUNDO

\* Shuruudaha Jidka Shakhsi Ahaaneed (PPR) waa maaddooyin la kala doorto mawduuc kasta kaas oo waafaqsan rabitaanka ardayga iyo Qorshihiisa Dugsiga Sare iyo Wixii ka Danbeeya. Dhibcaha farshaxanka iyo luuqadda adduunku waxaa lagu baddali karaa wax maaddooyin kale oo kuwa la kala doorto ah, taas oo ku salaysan qorshaha ardayda.

### QALINJABINTA KADIB

2-AMA 4-SANADOOD KUULIYAD AH

CIIDAMADA

TABOBARKA MIHNADDA

TABOBARKA SHAQADA

SHAQADA  
(Toos u tag shaqada taas oo qayb ka ah jidka mihiinada)

